JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2015

# AF-SOOMAALI

20
15

GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA

SomEXams

**WADARTA GUUD** 

**MAGACA** ........................................................................

**DUGISGA** ........................................................................

**Roll No** ........................................................................

**JAMHUURIYADDA SOOMAALILAND**

**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE**

**GUDIGA IMTIXAANNAADKA QARANKA**

**IMTIXAANKA SHAHAADIGA AH EE DUGSIGA SARE**

## Fasalka 4-aad

# IMTIXAAN SOOMAALI

**June 2015**

**Waqtiga 2 saacadood**

**10 daqiiqo oo dheeraad ah ku akhri dhamaan qaybaha imtixaanka si' aad u hubiso**

**FARRIIN :** Imtixaanku wuxu ka kooban yahay 10 bog oo daabacan tiri oo wargeli hor-joogaha haddii ay wax kaa maqan yihiin ama dheeraad yihiin.

| | |
|---|---|
| **QAYBTA 1-AAD: SHEEKO IYO ERAYO** | **35-dhibcood** |
| **QAYBTA 2-AAD: MAANSO IYO MAAHMAAHYO** | **25-dhibcood** |
| **QAYBTA 3-AAD: HUMAAGYO** | **10-dhibcood** |
| **QAYBTA 4-AAD: NAXWE** | **10-dhibcood** |
| **QAYBTA 5-AAD: CURIS** | **20-dhibcood** |
| **WADARTA GUUD** | **100-dhibcood** |

**Qaybt 1-aad :** **( 35 Dhibcood)**

**B) Akhri sheekadan ka dibna ka jawaab weydiimaha ka dambeeya**

# Naylo-Jaliye

Ka dib markii Jiilaal aad u jimcoonaa biyo jaban iyo caws lagu soo mooday ayaa hogol naylo-jaliye ay hawd laba galbood oo is xiga ka hilaacday.

Illeen waa nolol baadiye iyo caadadeede intii aan biyo dhacii roobka la' hubsan baa lallabe hayaan hanqalka loo taagay. Waar habeen danbe hala guuro iyo maya ee Axadu ha ina dhaafto mooyee hala baxnaaniyo cidiba islamay soo qaadin. Oday waa guune Xaaji Mire oo xidigiye moorada calaal bixiye ahaa, sideetan jirna cagocagaynaayay baa yidhi: Waar odayaashii hore kan oo kale kumay degdegi jirine, bal aan ayaamo cirka baxnaannino.

Hase yeeshee waxba waa laga dhegeysan waayay. Dabadeedna cilmi dhegood iyo waayo aragnimo wuxuu lahaa intuu soo bandhigay ayuu yidhi : " Waar marka hore cirkan aad arkaysaan tuskii la sugaayay maaha oo waa dhicis, maxaa yeelay labadii boqol ee habeen jiilaal ma buuxsamin waa marka labaade sannadku waa arbaca , hogoshuna faraaci bay curatay oo tuskan oo kale ku hayaankiisa odayaashii hore may ammaani jirin ee xoolaha biyahooda iyo cawskooda ha'loo daayo.

Markii waxba laga hoos qaadi waayay ee weliba maskax gabowday iyo Alle koodnimo lagu tilmaamay ayuu laba saddex jeer oo is xigta yidhi:" Waa kaliil dheer kontonlay ah ee maxay noqon doontaa"? dabadeedna wiilashiisii ayuu amar ku riday oo yidhi :" Reerku taladay ma guuraayo ee biyihiisa ha joogo". Axaddii markii la iska saaray, ayay Xaaji Mire iyo dhawr qoys oo kale mooyaane intii kale caynka hoosta gelisay. Khayr raro iyo ka rayso ayaa yeedhay. Waa hayaan iyo caadadiiye guure, galab carrawtiin iyo maalin-sawaal baa socod la galaa bixiyay.

Wax geediga la sii hitiqiyaba maalin-afraadiibay reerihii beesha ugu horeeyay rayska cidhifkiisii soo gaadheen. Dhulka oo markiisii horeba biyo qabtin yaraa iyo roobka da'ay oo hogol horraad kaliileed ahaa dartood ayaa dhulka biyo badan lagu gaadhi waayay.
Hasa ahaatee reerihii ugu soo horreeyey xareedbay dad iyo duunyoba ka hirqadeen, weelkana ka dhaansadeen. Haqablihii dambe qudhoodu daba goosibay heleen, hadhaagiisa afku-rubadle mooyaane biyo kamay harraad beelin.

Dhulka doogsaday marka horeba ma taf dheerayn, roobkuna asalkiisuba ma tus fogayn oo udubka ayaa ku habsaday. Ciiddii waa la rays derderey, saaciina raafka iyo iligtaa lagula kala tegay. Halaw iyo hogo kaliileed baa dad iyo xooloba u run sheegay. Biyo way fogaadeen daaqna waa gaabaabsiyey, tallo iyadu farahay ka haadday, xaalna wuxu isugu soo ururay "Cir kaa dheer, dhul kaa dheer". Laba bilood oo cir Alle ka dhashay baan caad daruureed la'arkin. Idihii intay abaar ku dhaleen bay wax rimay waroobay iyo wax laga gaban-ka-xooray noqdeen.

Lo'dii iyadu bishii horeba kamay soo hadhin. Mar ay duunyo xoolaad gaabaabsi tahay , dadna qiire qiire ku jiro ayuu gugii la'sugaayay hoorey, inkasta oo hanfigii iyo abaartii laga qabowsday haddana caano lagama haqab beelin.


©SLNECB, 2015

**T) <u>Goobo geli jawaabta saxda ah</u>**

1- " Jiilaal jimcoon" waxa looga jeedaa:

b) Jiilaal kulul t) Jiilaal qabow j) Jiilaal adag x) Intaba.

2. " Naylo-jaliye" waxa loo yaqaan:

b) Roob kaliisha horteeda da'a t) Roob jiilaalka hortiisa da'a
j) Roob dayrta da'a x) Roob guga hortiisa da'a

3. "Alle Koodnimo" waxa looga jeedaa:

b) Nacasnimo t) Jaahilnimo j) Gaalnimo x) Intaba.

4. Mooradu waa aqoon ku saabsan :

a) Dhaqanka b) Internetka j) Xidigiska x) Intaba.

5. "Udubka ayaa ku habsaday" waxa looga jeedaa:

b) Beelo badan baa ka guuray t) Beelo badan baa degay
j) Beelo badan baa ku dagaalamay x) Intaba.

6. Xilliga Kaliishu waa:

b) Xilli kulul oo roobka ka danbeeya t) Xilli kulul oo roobka dhexdiisa ah
j) Xilli kulul oo roobka ka horreeya x) lntaba.

7. Rimay warowgu waa ;

b) Laxdu iyada oo dhashay markay dhimato t) Laxdu iyada oo irmaan markay dhimato
j) Laxdu iyada oo dhalaysa oo weyd ah markay dhimato x) B iyo T.

8. " La'sii hitiqiyaba" waxa looga jeedaa:

b) La sii daayaba t) La sii didiyaba j) T iyo B x) La sii wadaba

9. Ciidda rayska ah markay cagtu ku badato waxa loo yaqaan:

b) Rays derder t) Rays engeg j) Rays qaad x) B iyo J.

10. Laxda weyni si ay u badbaado marka naysha laga gudhiyo waxa la yidhaa:

b) Gaban ka xoor t) Gaban ka xidh j) Gaban ka dayn x) Intaba


©SLNECB, 2015

11. Ereyga olole waxa uu macne ahaan la'mid yahay:

b) Hayaan t) Lalabe j) Banaanbax x) B iyo T

12. "Haqable" waxa looga jeedaa:

b) Dad baahan t) Dad dheregsan j) Dad habowsan x) Intaba.

13. "Caynka hoosta gelisay" waxa looga jeedaa:

b) Guurayn t) Guurtay j) Gabbatay x) Intaba.

14. Xaaji Mire waxa uu waayo aragnimo iyo aqoon buuxda u lahaa:

b) Cilmiga xidigiska t) Xeerarka Soomaalida

j) Deegaanka x) Intaba.

15. Roobka waxa kale oo loo yaqaan:

b) Tigaad t) Tanaad j) Tus x) Intaba.

16. Socodka maalintii waxa loo yaqaan:

b) Maalin sawaal t) Dhalandhool j) Jarmaade x) T iyo J.

17. " Neef kama af-qudhmin" waxa looga jeedaa:

b) Neef kama lumin t) Neef kama hadhin j) Neef kama bakhtiyin x) Intaba.

18- "Caano lagama haqab beelin" waxa looga jeedaa:

b) Caano lagama dhergin t) Caano lagama helin j) Caano lagama maalin x) Intaba.

19- "Sannadku waa Arbaca" waxa looga jeedaa:

b) Sannadku waa barwaaqo t) Sannadku waa abaar

j) Sannadku waa dhammaad x) T iyo J.

20. "Afku rubadle" waxa looga jeedaa:

b) Dadka iyo xoolaha weyda ah t) Dadka iyo xoolaha roobku helay

j) Dadka iyo xoolaha gaajaysan x) Dadka iyo xoolaha haraadka u nugul.


©SLNECB, 2015

21. Erayga ugu yar e Afsoomaligu waa:

b) I t) Sii J) Tag x) Tin.

22. Magaca waxa lagu gartaa:

b) Qodob, tiro, yeele t) Qodob, jinsi, tiro j) Fal, qodob, xidhiidhiye.

23. Magac gaar ah waxa loo qoraa sidan:

b) caLi t) cali j) Cali x) CALI.

24. Magac guud marka la qoraayo waa sidan:

b) Weynee xarafka ugu horreeya t) Yaree xarafka ugu horreeya oo keliya
j) Weynee dhammaan x) Ma'kala laha xaraf weyn iyo mid yar.

25. Magac u yaalku waa sidan:

b) Adiga, Aniga, Iyada t) Adiga, ka iyo la
j) Idinka, Annaga iyo Ga x) Iyada, la iyo Aniga.

26. Meelecye waxa ka mid ah:

b) lo, ga, ku t) ka, ku, lo' j) iyo , ka, keer x) Ka, ku, iyada

27. Ereyga Falka ahi waa :

b) Hayaan t) Tagoog j) Bax x) Kuweer

28. Falkaabku waa:

b) Tegay t) Kuwaa j) Yimi x) Si' xun.

29) Ereyga sifo waxa ka mid ah:

b) Gaaban, dheer, buuran t) Gaabinaya, dheeraynaya
j) Noqo, kaalay x) Mulac

30- Yeeluhu waa wax weedha wax ka sheega sida:

b) Madow t) Mire j) Fog x) Daran

31. la'yeeluhu waa :

b) Waxa aanu yeeluhu samayn t) Waxa sifadu tahay
j) Waxa falka yeeluhu ku dhaco x) Waxa falkaabuhu yahay


©SLNECB, 2015

## Qor macnaha ereyadan

1- Hanqal : ................................

2- Faraaci :.................................

3- Bay: ...................................

4- Buqul:...................................

## Qaybta 2-aad ( 25-dhibcood )

Maanso iyo Maahmaahyo

1- Naag yahay wadnaha kuuma gelin waanadii hore'e,
weedhaan qalbiga kuugu riday welefku kaa qaadye
wacdigaan ku faray waadigaan wegere xaalayne

i) Ka soo saar meersiyadan dabeecadaha uu abwaanku ku dhaliilay afadiisa?

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

2- Ridaan badhaha jiilaal ku furay buurta dhaladeeda
Een baarqab leekow orgiga ba'an ku sii daayay
Ee waxarta bayga leh dhashay een bidix ku laalaadshay
Een buqulka caano ah ka dhamay sidigta oo biistay
Miyaa boojo geel lala simaa bixiso weeyaane ?

i) Falanqee dulucda macne ee meerisyadan?

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................


©SLNECB, 2015

ii) Miyaad ku raacsan tahay hal-abuurku sidan uu riyaha u ammaanay ?

ii) Sheeg sababta?

3. Lafta dhabar laxaadka i dabciyo laafyihii gacanta
Lubidaydu layl xalay ma'ledin laadadyiyo taahe

i) Soo bandhig hal-abuurku waxa uu kaga calaacalaayo labadan tuduc?

**Maahmaahyo.**

1- Cirdkaan arkaayo ilko kama soo jeedaan

i) Kaboolaha aad kabo ka tolanayso kabihiisaa la'eegaa

ii) Midee dulucda labadan maahmaahood.

2. Inaadeerkaa foolxumana wuu kugu caayaa, faayana kuuma ogola

i) Faallo ka bixi dulucda maahmaahdan ?


©SLNECB, 2015

**Qaybta 3-aad : Humaagyo ( 15 dhibcood)**

b) Ka soo saar tixahan humaagga ku jira mid kasta:

1- Waxaan ahay nin argaaga jecel aadna kuu necebe

2- Shifo waxaan lahayn oo la'cuno sheeg haddaad garato

3- Hasha jilicsan iyo qaalmahaad wada jaleecayso ,
mid ku joogso layskuma darsado laba jidhaamoode

4- Hal I galay sidii ugaxda goray ha'igu gadhnaado

**Qaybta 4-ad: Naxwe ( 10 Dhibcood)**

b) Kala saar erayadan adiga oo u eegaya amintooda

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1- sameeyaa | 2- tegey | 3- noqday | 4- cabbaa |
| 5- joogay | 6- seexdaa | 7- cunaa | 8- ciyaardoon |

**Qaybta 5-aad: Curis ( 20 dhibcood)**

b) Mid ka dooro labadan qodob ka dibna ka qor curis ka kooban ugu yaraan 200 erey.

1) Beeraha 2) Khayraadka badda

**Digniin:** Haku qorin curiska dhexdiisa magacaaga, Dugsigaaga iwm. Haddii aad ku qorto waxaad ku waayi dhibcaha derejada imtixaankaaga.


©SLNECB, 2015

©SLNECB, 2015